

Wadajir ayaan adduunka u wanaajineynaa.

Mabaadii'da Laanqeyrta Cas

La soo xiriir ama soo booqo.

BANI'AADMINIMO

EEXASHO LA'AAN

DHEXDHEXAADNIMO

MADAXBANAANI

MUTADAWACNIMO

CAALAMINIMO

MIDNIMO

HELSINKI Uudenmaankatu 32 A, 00120 Helsinki
09 622 4322, turvatalo.helsinki@punainenristi.fi

ESPOO Läkkipänsäntie 2 A 14, 02650 Espoo
09 8195 5360, turvatalo.espool@punainenristi.fi

VANTAA Bangalada Rekola, Sairaarakatu 3, 01400 Vantaa
09 871 4043, turvatalo.vantaa@punainenristi.fi

TAMPERE Hämeenkatu 22 C, 33200 Tampere
040 556 6661, turvatalo.tampere@punainenristi.fi

TURKU Yliopistonkatu 24 A 15, 20100 Turku
02 253 9667, turvatalo.turku@punainenristi.fi

nuortenturvatalo.fi
facebook.com/turvatalo
twitter.com/turvatalo



Punainen Risti



*Xaqa uu qofkasta
u leeyihiin
dad ammaan ah*



Punainen Risti
Nuorten turvatalo



Waxkasta waxbaa laga sameyn karaa

Caawimaad ma u baahantahay si aad uga gungaarto xaaladda nololeed? Guriga ama meel kale miyeey ka jiraan arrimo aad rabi laheyd in wax laga beddelo?

La xiriir guriga ammaanka Dhallinyarada.

- Caawimaad lacag la'aan ah ayaad degdeg nooga heleysaa.
- Waxaan halkan u joognaa adiga darteed.
- Wadajir ayaan xalka u raadinaynaa.

Guriga ammaanka dhallinyarada waxaa da'yarta iyo ja waalidkaba ku caawiya mutadawaciinta xirfadlayaasha ah ee Laanqeyrta Cas.



” Waxaan caawimaad u helaa arrimaha saxda ah iyo marka aan u baahanahay.

Da'yar, Tampere

Caawimaad iyo talobixin afar iyo labaatanka saac ah.

Waxaad na weydiin kartaa waxkasta oo ku saabsan arrimaha dhallinyaranimada iyo waalidnimada. Waxaan gacan ka geysanaa dhibaatooyin kala duduwan oo ku saabsan xaaladaha nolol-maalmeedka joogtada ah iyo xasaradaha nolosha.

Deegaanka kumeelgaar ah

Waxaan da'yarka siineyaa haddii loo baahdo meel nabad ah oo habeenki seexdo. Dhallinyarada iyo qoysaskaba waxaan ka caawineynaa in ay xaaladda nololeed ee dhibka leh u helaan nafis iyo xal.

Caawimaadda wadasheekeysiga

Da'yarka iyo qoyskiisaba waxaan u taageernaa islamarkaasna u caawinaa qaab wadasheekeysiga. Xalka waxaan wadajir ula raadinaa da'yarka, qoyska iyo hay'adaha kale ee da'yarka taageera. Waalidiintu xittaa waxay taageeradeena u helayaan arrimaha la xiriira waalidnimada.

Mararka qaar arrinta waxaa lagu xallinkaraa wadasheekeysiga gaaban, laakiin waan dhegeysaneynaa wakhti dheer iyo marar badanba illaa iyo inta loo baahanyahay.

Hagaajinta habsami-socodka hurdada

Waxaan da'yarka ka caawineynaa hagaajinta habsami-socodka afar iyo labaatanka saac ee isku qasmay, kaas oo dhibaato ku ah dhigashada dugsiga iyo qabashada arrimaha kale ee nololmaalmeedka.

Taageerada xoroobidda

Waxaan dhallinyarada ka caawinaa in uu iskiis meel u dego iyo u wareegista nolol xor ah.

Taageerada shabakadda

Waxaan qeyb ka nahay Chatka Sekasin oo da'yarku qof qaangaar ah oo lagu kalsoonyahay uu kala sheekeysan karo wax kasta oo qalbiga culeys ku ah.

Taageero deegaan iyo waxqabad mutadawacnimo.

Waxaan hirgelinaa waxqabad bulsho oo xoojiya caafimaadka dhallinyarada iyo qoysaska. Waxaan bixineynaa fursado looga qeybgalo waanaajinta adduunka.

